

Iska qaad shaybaarka cudurka [Covid-19]

Kahor inta aad shaybaarka iska qaadista bilaabin waa inaad hab taxdarsan u aqrisato tilmaan-bixinta shaybaarka.


Shaybaarkani waxaad iska qaadi kartaa haddii aad haysato aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan. Haddii aqoonsiga noocaas aadan haysan oona dooanyso inaad ballansato shaybaar iska qaadista wac 021-17 30 00 kaddib xulo badhanka 1-aad.

Isku diyaarinta shaybaarka


Waxaad u baahan tahay:

- Aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo yaqaann [E-legitimation]
- Bacda shaybaarka oo ay ku jiraan: tuubada shaybaarka, dhalo yar oo ay ku jirto dhareere cusbo leh, koob candhuufta iyo dhengedda shaybaarka.

Bacda shaybaarka waxaa ku jira




- 1 Fur bacda kaddib diyaarso tuubada shaybaarka iyo dhalada dhareeraha cusbo leh
- 2 Adigoo furka ka wareejiya fur dhalada dhareeraha cusbo leh.
- 3 Dhalada dhareeraha cusbo leh gebi ahaan ku shub tuubada shaybaarka. Sii wad oo sii hay tuubada shaybaarka ama xasilan meel iska dhig.
- 4 Imminka waxaa hab waafaqsan tilmaan-bixinta halkaan hoos ku xusan ku dhaqaaqi doontaa saddex shaybaar.



Sidatan ayaa shaybaarka laysaga qaada


Dhuunta – shaybaarka 1-aad

- 1 Qabso dhengedda shaybaarka kaddib geli gudaha dhabanka kaddib sii wad ilaa dhuunta inta aad kari karto. Dhengedda ka ilaali inaad ku taabato carabkaaga, ilkahaaga ama ciridka.
- 2 Dhengedda shaybaarka ku xoq qiyaastii 20 ilbiriqsi dhinac kasta oo halka dhuunta ugu hooseeyso.
- 3 Dhengedda shaybaarka dhuunta ka soo saar.




Sanka – shaybaarka 2-aad

- 1 Isla dhengedda shaybaarka dhexgeli duleelka sanka. Ku xoq qiyaastii 2-3 sm gudaha sanka 20 ilbiriqsi. Isla sidaas u xoq sanka kale.
- 2 Dhengedda shaybaarka sanka ka soo saar kaddib gacanta ku sii haay.



Candhuufta – shaybaarka 3-aad

- 1 Diyaarso koobka candhuufta kaddib dhawr jeer candhuuf ku tuf ilaa candhuuftaada si fiican ugu daboolato baaxadda.
- 2 Soo qabso isla dhengedda shaybaarka oo aad isticmaashay, kaddib 20 ilbiriqsi ku dhex wareeji candhuufta.
- 3 Dhengedda shaybaarka dhexgeli tuubada haybaarka kaddib ku dhex wareeji qiyaastii 20 ilbiriqsi.
- 4 Dhengedda shaybaarka ka soo saar tuubada shaybaarka kaddib sii fiican furka ugu xir.
- 5 Aad u hubso in dhareeraha u weli ku jiro tuubada shaybaarka iyo in furaha u si fiican tuubada shaybaarka ugu xiran yahay.
- 6 Tuubada shaybaarka dhexgeli bacda yar kaddib si fiican u xir. Waa tani tan laga rabo



Vänd sida ►

Qashinka tuur


Bac ka wayn waxaa dhexgelisa koobka candhuufta, dhengedda shaybaarka iyo waxyaalihii kale ee aad isticmaashay kaddib qashinka ku tuur. Bacda qashin caadiga ahaan ayaa u tuuri kartaa goobta qashinka caadiga ah.

Diiwangeli shaybaarkaaga – guda-gal barta internetka 1177

Ogeysiis lambarka shaybaarka ee ilmaha aan weli 13 sano buuxsan, ma isticmaali kartid Koodka-QR sidii sidii aad u diiwaangeliso lambarka shaybaarka. Ka aqriso halkaan hoos sidii loo diiwaangeliyo lambarka shaybaarka ee ilmaha aan weli 13 sano buuxsan. Shaybaarkani waxaad iska qaadi kartaa haddii aad haysato aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan. Haddii aqoonsiga noocaas aadan haysan oona dooaniso inaad ballansato shaybaar iska qaadista wac 021-17 30 00 kaddib xulo badhanka 1-aad.

Sidatan sameey haddii da'daada ay tahay 13 sano ama ka wayn

- 1 Kaameerada mobaylkaaga ama appka QR ku aqri Koodka-QR, kaddib tixraac isku-xireha ku soo ifbixi doona kaddib adigoo isticmaalayo aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ku guda-gal. (Ilmaha da'dooda ka wayn 13 sano waa in ay isticmaalaana aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan oo iyaga u gaar ah)
- 2 Sida aad ku diiwan geliso bacda shaybaarka ee adiga ku gaarka ah darteed tixraac tilmaan-bixinta mobaylka ku qoran. Lambarka aad ku buuxin doonto wuxuu ku qoran yahay summadda.
Haddii mobaylkaaga aadan Koodka-QR ku aqrin karin, bogga internetka adreeskaan ku fur: <http://pep.1177.se/testkit>



Haddii aad xilhaayeha xannaanadda/waalidka ilmo aan weli 13 sano buuxsan tahay sidatan sameey.

Haddii aad xilhaayeha xannaanadda/waalidka ilmo da'dooda u dhaxayso 5-13 sano tahay, waa in lambarka bacda shaybaarka ee cunugga diiwaangelisa adigoo isticmaalayo **qaabka wakiilashada ombudsläge**.

- 1 Fur bogga internetka kaddib adreeskaan ku qor/fur: <http://pep.1177.se/testkit>
- 2 Guda-gal adigoo isticmaalayo aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan ee loo
- 3 yaqaanno
- 4 Xulo ubadkaaga qaabka wakiilashada (ombudsläge)
- 5 Kaddib xulo maaraynta shaybaar iska qaadista
Diiwaangelin lambarka bacda shaybaarka oo ku qoran summadda.

Falanqayn darteed soo gudbi shaybaarkaaga

Kaddib markii aad sameeyso dhammaan tallaabooyinka kor ku xusan, waa inaad falanqayn darteed soo gudbiso shaybaarkaaga, hab waafaqsan warbixinta lagu siiyay markii bacda shaybaarka gacanta laga saaray. Falanqaynta darteed waa inaad sida ugu dhaqsida badan soo gudbiso shaybaarkaaga. Barta internetka 1177.se/Vastmanland/sjalvprovtagning-vastmanland waxaad ka heleysa warbixin halka aad shaybaarka geyn karto.

Tilmaan-bixintaan iyo Koodka-QR kaydso, ilaa jawaabta shaybaarka lagu siiyo.

Jawaabta shaybaarka

Caadi ahaan 48 saacadood gudahooda ayaa jawaabta shaybaarka lagu siinayaa, laakin mararka qaarkood waxay qaadan kartaa ilaa 4 maalmood. Sida aad ku aqrisato jawaabta shaybaarka waa inaad guda-gasho barta internet 1177.se, ka eegt hoosta cinwaanka Egenprovhantering, kaddib jag-sii isku-xireha *Beställ provtagning och se svar*.

Haddii berri hore aad oggolaatay in barta internetka 1177.se ogeysiis lagaga soo diro, waxaa lagu soo diri doonaa farinta sms ama e-mail markii jawaabta shaybaarkaaga la helo.

Taageero

Wixii su'aallaha farsamada ku salaysan ee xiriirka la leh **diiwangelinta registrering** shaybaarka guda-gal barta internetka <https://1177.support.se/oversikt/flow/38>

Wixii su'aallo oo xiriir la leh guda-gelista **om inloggning på 1177.se**, wac *Kontaktcenter* 021-17 30 00, xulo badhanka 1-aad. Saacadaha waa isniin-jimce 9-17.